

# Dugsi Male Qabyaaladi

Cabdillahi Suldan Tima Cadde

Dabuubtiisa gabay waan ka tagay, dihashadiisiye  
Dubaaqayga waataan ka jaray, waa fog dabadeede  
Shin kastood daleed uga baxdoo, nabar isdiidsiiso  
Dibnahaagu shaygay bartaan, waad ku dayataaye  
Haddii gole dabbaaldeg iyo farax, loo dalbado maalin  
Oo loo duddeeyoo khalqigu, daawasho u joogo  
Uu mid aan daryeelini xakame, daamanka u geliyo  
Uu duulin orodkuu lahaa, dalacsi siin waayo  
Uu cidhibta darrandoorriyuu, duubo madaxiisa  
Debcin maayo oo wuxuu ka baqan, inuu ka duulaaye  
Haddaad adigu daacuun ku tahay, dooddan iyo baacin  
Gacmaha waa ka daayaa ninkii, fuulmo daashadaye  
Jeeroon direyska u gashoon, dibeda soo taago  
Daleen aniga iigama tagee, waa dig siin jiraye  
Waxaan gabayga deelka iyo laftiyo, diirka uga qaaday  
Dadka waxaan ogaysiinayaa, dowgu suu yahaye  
Soomaaliday dayaya wanaag, idinka doorsoonye  
Docda Bari, dorooriga baddiyo, Seylac deriskeeda  
Dusha koonfureed iyo ilaa, wabiga daaciisa  
Degmadeena oo idil haddaan, dayey abwaankeeda  
Nimaan duubiyadu naafo noqon, deelka laga waaye  
Dul iyo hoosba waan ugu dhigaye, waa dix-dhagaxeede

Dikt på somali

Anuunbaa damqanayee dheghu, uma daloolaane  
Dadkaan la hadlayaa baan lahayn, dux iyo iimaane  
Bal inay dalfoof tahay caqliga, dooni laga saaray  
Wixii hore usoo daashadaay, degashanaysaaye  
Doc hadday u wada jeedsatooy, dhowrto danaheeda  
Ooy duul walaala ah tahaayo, duunka ka heshiiso  
Dadka Kama yaraateene ways, dabar jaraysaaye  
Dubba madaxa wayskala dhacdaa, daa'in abidkiise  
Goortay is wada dooxatay baa, daad u soo geliye  
Ubadkiinii waad daadiseen, waana dubateene  
Dubaaxdiisii waad wada cunteen, duhur dharaareede  
Dariiq toosan Soomaaliyey, waa lagaa dedaye  
Darajada Ilaahay ninkii, doonayaa hela e  
Nin ka duday distoorkiyo waxyiga, diinti ka carrowye  
Dugsi maleh qabyaaladi waxay, dumiso mooyaane  
Hadaynaan xumaanta iyo dilkiyo, daynin kala qaadka  
Dibaddaan ka joognaa sharciga, daacadda Illahe  
Danbarkeedu waa Jahannamiyo dogobkii naareede  
Dugsi ma leh qabyaaladi waxay dumiso mooyaane  
Dir dir la isu laayiyo intaan, weerar daba joogno  
Ooy dumarku weerkii sitaan, danabadii waayey  
Uu sida dureemada u yaal, meydku dibaddiinna  
Wallee doogsan maysaan intaad, dunida joogtaane  
Dugsi male qabyaaladi waxay dumiso mooyaane